# 2024

## Dheefaha Magaalada Seattle ee aad ku Heli Karto Si Fudud

(Shaqaalaha leh *Dheefaha Caymiska ee *SPOG*)

**U qalmitaanka:** Shaqaalaha cusub iyo dadka ku tiirsan, caymisku wuxuu bilaabmayaa maalinta ugu horeysa ee shaqadaada haddii taariikhdaas ay tahay maalinta taariikhda ugu horeysa ee bisha loo qoondeeyay inay noqoto maalin shaqo ee magaalada. Ama caymisku wuxuu bilaabanayaa maalinta koobaad ee bisha loo ama loo aqoonsaday maalinta ugu horeysa ee shaqada ee shaqada lagaa shaqaalaysiiyay. Haddii shaqadaadu bilaabanto taariikhdan kadib, caymiskaagu wuxuu bilaabmayaa maalinta kobaad ee bisha soo socota.

**Dadka ku Tiirsan ee U Qalma:** Dadka u qalma caymiska waxaa kamid ah xaaskaaga ama lamaanahaaga qoyska, ilmaha aad dhashay ama carruurta aad korsatay ama carruurta laguu xilsaaray korintooda, carruurta lamaanahaaga qoyska, carruurta uu adeerka u yahay, iyo ilmo kasta oo aad u tahay mas'uulka sharciga ah ama kan Amarka Taageerada Ilmaha ee Aqoonta leh uu u baahan yahay caymis. Caruurta waaweyn waxay u qalmaan caymis haddii ay ka yar yihiin 26. Haddii aad ku darto dadka kugu tiirsan, waxaa lagu weydiin doonaa dukumeenti cadeynaya u-qalmitaanka caymiskooda iyada oo loo marayo qorshayaasha Magaalada Seattle.

**Iska Diwaangalinta**: Waa in aad iska diwaangalisaa 30 maalmood gudahooda ee shaqaalaysiinta. Haddii aad ku guul dareysato inaad iska diwaangeliso 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhdaada shaqaalaynta, waxaa si toos ah lagaaga diiwaangelin doontaa caymiska caafimaadka ilkaha iyo araga ee aasaasiga ah. Daboolistaada ilkuhu wuxuu noqon doona qorshaha Delta Dental of Washington.

**Daryeelka Ilkaha:** Waxaad dooran kartaa Delta Dental of Washington ama Dental Health Services. Qorshayaasha ilkaha waxa kamid ah caymiska dadka ku tiirsan ee u qalma. Lacagta caymiska waxaa si buuxda u daboolaya Magaalada Seattle.

**Araga:** Magaaladu waxay bixisaa qorshaha daryeelka araga iyada oo loo marayo VSP (Vision Service Plan). Magaalada Seattle waxay si buuxda u bixisaa lacagta caymiska oo ay ku jirto caymiska dadka ku tiirsan ee u qalma. Baaritaanka indhaha ee sanadlaha ah ayaa la daboolaa sanad walba.

**Caafimaad:** Waxaad ka dooran kartaa Qorshaha Heerka Caadiga ah ee Kaiser Permanente, Qorshaha Ka Hoortag ahaaneed Aetna, ama Qorshaha Daryeelka Soo Jireenka ah ee Aetna. Kharashka bilaha ah ee mid kasta oo kamid ah qorshayaasha waa sida soo socota:

| | **Kharashka Caymis ee ay Ku Bixinayaan Shaqaalaha Caymiska** |
|---|---|
| **Qorshaha Caafimaad** | **Shaqaale leh ama aan lahayn xaas/lamaane qoyska iyo caruur** |
| Aetna Preventive | $121.78 |
| Aetna Traditional | $108.58 |
| Kaiser Permanente Standard | $ 86.18 |
| Qorshaha Kaiser Permanente ee Lacagtiisa la Jaro | $ 63.88 |

**Koontada Kharash Garaynta Dabacsan (Flexible Spending Accounts, FSA):** Magaaladu waxay bixisaa Daryeel Caafimaad iyo Daryeel maalmeedka FSA iyada oo loo marayo Navia Benefits Solution. Koontada FSA ee Daryeelka Caafimaadka waxay kuu ogolaanayaa inaad isticmaasho lacagta cashuurta kahor si aad u hesho kharashka caafimaadka, ilkaha, iyo kharashka araga uu u qalmo. Koontada FSA ee Daryeel maalmeedka waxay kuu ogolaanaysaa inaad hesho kharashka u qalma kharashaadka xannaano maalmeedka ee ubadkaaga kugu tiirsan ilaa da'da 13, xaaska naafada ah / lammaanaha guriga, ama waalidka kugu tiirsan.

Waxaad dooran kartaa ugu yaraan $120 ilaa $3,050 sanadka 2024 daryeelka caafimaadka FSA iyo $5,000 ee qorshaha Daryeelka Maalintii. Haddii aad doorato inaad ka qaybgasho qorshahan oo aad rabto inaad sii wadato ka qaybqaadashadaada, waxaad u baahan doontaa inaad dib isugu diiwaangeliso sanad kasta inta lagu jiro xilliga diiwaangelinta furan ee Magaalada.

Waxa laga yaabaa in aad qaadato ilaa $610 lacagaha FSA ee Caafimaadka ee aan la isticmaalin laga bilaabo qorshaha sanadka 2024 ilaa sanadka qorshaha 2025 ilaa inta ay natiijada xawilaadu ka dhalanayso cabirka koontada ugu yar ee $120.

**Caymiska ee Naafonimada Mudada Dheer:** Seattle Police Officer's Guild wuxuu bixiyaa caymiska naafanimada mudada dheer. Isdiwaangalinta waa waajib. Wac (206) 767-1150 wixii faahfaahin ah.

*Waxaa kamid ah xubnaha Seattle Police Officer's Guild iyo xubno ka tirsan Seattle Police Management Association kuwaas oo iibsada ilaa qorshayaasha SPOG. Xubnaha SPMA - la xiriir wakiilkaaga dheefaha si aad u hesho saamiga kharashka caymiska.

**Caymiska Aasaasiga ah ee Nolosha Mudada ee Aasaasiga ah:** Waxaad ka dooran kartaa mid kamid ah labada qorshe - Caymiska Aasaasiga ah ee Nolosha Mudada ee Aasaasiga ah, oo ah hal iyo bar dakhligaaga sanadlaha ah, ama Kooxda Aasaasiga ah ee Muddada Nolosha Caymiska ee $50,000. Magaaladu waxay ku biirin doontaa 40% ee kharashka Caymiska Nolosha Muddada ee Aasaasiga ah.

**Caymiska Kaabista ah ee Mudo Nolosha kamid ah:** Haddii aad dooratay Muddada Kooxda Aasaasiga ah, waxaad iibsan kartaa caymis nololeed oo dheeri ah oo loogu talagalay naftaada, xaaskaaga/ lamaanahaaga qoyska, iyo caruurtaada. Caymiska nolosha ugu badan ee aad heli karto waa afar labanlaab dakhligaaga sanadlaha ah. Xaaskaaga/Lamaanahaaga qoyska waa 100% qadarka caymiska aad adigu doorato ilaa ugu badnaan $500,00. Waxaad u iibsan kartaa $2,000, $5,000 ama $10,000 caymiska caruurtaada.

**Ku Dhimasho shil ah iyo goynta Adimaha Caymiska (Accidental Death & Dismemberment Insurance, AD&D):** Waxaad iibsan kartaa caymiska AD&D oo loogu talagalay adiga kaligaa ama adiga iyo qoyskaaga. Caymiska la heli karo wuxuu ka bilaabanayaa $25,000 ilaa $500,000.

## Dheefaha Hawlgabka

Washington State Department of Retirement Systems: Xubinimada Nidaamka Hawlgabka ee Waaxda Gobolka Washington waa waajib. Fadlan la xiriir Washington State Department of Retirement System wixii macluumaad ah ee ku saabsan qorshahaaga. Waxaad wax badan u kaydsan kartaa lacag badan hawlgabkaaga adiga oo isticmaalaya Qorshaha Magdhawga Ikhtiyaariga ah ee Dib loo Dhigay ee Magaalada (hoos ka eeg).

**Qorshaha Magdhawga Dib loo Dhigay ee Ikhtiyaariga ah:** Diiwaangelinta Qorshaha Magdhawga Dib loo dhigay ee 457 ee Magaalada waa ikhtiyaari. You are allowed to contribute through payroll deductions. Adiga ayaa go'aaminaya qadarka lacagta, nooca lacag bixinta, iyo fursadaha maalgashiga. Waxa laga yaabaa inaad ku darsato ugu yaraan $10 jeegii mushaharkiiba. Isbedelka diiwaangelinta iyo wax ku biirinta ayaa la samayn karaa wakhti kasta. Magaaladu ma bixinayso lacag lamid ah qadardka aad bixinayso.

## Barnaamijyada iyo Dheefaha Shaqada/Nolosha

**Barnaamijka Kaalmada Shaqaalaha (Employee Assistance Program, EAP):** Kheyraadka Nolosha EAP waxay adiga iyo xubnaha qoyskaaga siisaa adeeg soo gudbinta iyo talo bixin. Hel caawinaad qarsoodi ah oo ku saabsan arrimaha gaarka ah sida walbahaarka, niyad-jabka, iyo dhibaatooyinka qoyska iyo xiriirka. Xubin kasta oo qoyska ka mid ah waxa uu xaq u leeyahay lix kulan oo saacad ah oo lacag la'aan ah sanadkiiba.

**Gaadiid:** Marka ay tusayaan kaarkooda astaanta ah, saraakiisha la dhaariyay waxay si lacag la'aan ah ugu raaci karaan wakaalado gaar ah. Saraakiisha la dhaariyay waxay u qalmaan inay isticmaalaan waxyaabaha kale ee barnaamijka ikhtiyaarka safarka shaqaalaha ee MyTrips, oo ay kamid yihiin caawinta qorsheynta safarka, isbarbardhigga baabuurka iyo gawaarida rakaabka wadaagaan, iyo in ka badan.

**Career Quest:** Career Quest waxay bixisaa fursado horumarineed oo xirfadeed oo habaysan si loo balaariyo xirfadahaaga ama looga caawiyo yoolalkaaga shaqo ee mudada-dheer. Si aad ugu qalanto, waa inaad tahay shaqaale caadi ah oo Magaalada ah, oo shaqeeyay ugu yaraan hal sano, oo aad u heelan tahay horumarinta xirfado iyo aqoon cusub.

**Maalmaha Fasaxa:** Magaaladu waxay leedahay 12 fasax oo rasmi ah iyo 2 fasax oo gaar ah. Waxaad qaadan kartaa fasaxyadaada gaarka ah wakhti kasta iyadoo la raacayo ogolaanshaha kormeerka.

**Fasaxa Dalxiis:** Waxaa kuu ururay fasax dalxiiska ku salaysan saacadaha heerka mushaharka caadiga ah. Qadarka fasaxa dalxiis ee la helay waxay ku xiran tahay muddada adeegitaankaaga—laga bilaabo 12 maalmood sannadkii shaqaale cusub ilaa 30 maalmood sanadkii ka dib 29 sano oo shaqo ah. Saacadaha fasaxa ee aan la isticmaalin waxaa loo qaadan kataa sanad kasta, ilaa ugu badnaan, taas oo ku xiran sanadaha adeegga.

**Fasaxa Jiro:** Waxaad kuu ururaya fasax jiro ahaaneed iyadoo lagu saleynayo tirada saacadaha caadiga ah ee la shaqeeyay. Shaqaalaha maalinta buuxa waxay helayaan 96 saacadood oo fasax jiro ah sannadkii. Waxaad u qaadan kartaa sanadka kale fasaxaaga jirada ee aan la isticmaalin, ma laha ururinta ugu badan.

**Fasaxyada Kale:** Magaaladu waxaa kale oo ay bixisaa fasax soo socda ee mushar leh iyo mid aan mushahar lahayn: fasax waalid oo mushahar ah, fasaxa aaska, fasaxa qoyska iyo caafimaadka, naafanimada uurka, waajibaadka xeerbeegtida, fasaxa waajibaadka milatariga, qofka ku deeqaha unug qof kale, fasax shakhsi oo aan mushahar lahayn, iyo fasaxa sabbatical.

Shaqaaluhu sidoo kale waxay leeyihiin ikhtiyaarka ah inay codsadaan Barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka Lacag-bixinta ee Washington marka lagu daro Fasaxa sare ee magaalada.

Seattle Human Resources

*La Cusboonaysiiyay 12/20/2023*